

TUSMADA URURKA MULKIILEYAASHA GURYAHA (HOA)



BMP-yada Geedaha lagu beeray

Maamulka ugu fiican ee Nidaamka Dhismaha Biyaha Daadka (BMPs) ayaa lagu rakibaa dhismeyaasha qaar oo ku yaala Ismaamulka si ay gacan uga gaystaan kahortaga maadooyinka wasaqda ah sida qashinka, daawooyinka bacriminta beeraha, sunta cayayaanka, iyo qaruuraxa soo gala marinnada biyaha daadka roobka kadibna galaaya balida, wabiyada, iyo badwaynta deegaankeena. Dhismaha gurigaagu waa mid kamid ah boqolaalka ku yaala Ismaamulkeena oo leh ugu yaraan hal BMP.

BMP-yaddu Waxay Nadiifiyaan Marinnada Biyaheena

BMP-yaada waxaa loo sameeyay inay maadooyinka wasaqda ah ka saaraan biyaha roobka ee kasoo dareera dhismahaaga. Maadaama aad tahay mulkiilaha ama maamulaha mid kamid ah dhismeyaashaan, xeerarka ismaamulka ayaa kaa doonaaya inaad **samayso kormeer joogto ah iyo talaabooyinka dayactirka** si loo hubiyo in BMP-yadaada si sax ah u shaqaynayaan.

Xubnaha Gudiga HOA, Maamulka Dhismaha, iyo Mulkiileyaasha Guryaha ee Gaarka ah ayaa Dhammaantood Door Ciyaara

Xog ku saabsan BMP-yada dhismaha ayaa badanaa lunta marka HOA yadu isbadelaan ayna yeeshaan maamul cusub iyo/ama shirkada maamulka dhismuhu isbadesho. Maadaama BMP-yo badan ay lagu rakibay aaga taagaga ah, waxaa si fudud loogu maleeyaa inay yihiin agab dayactir.

Sidoo kale waxaa adkaan kara in la kala saaro waajibaadka HOA iyo waajibaadka mulkiileyaasha gaarka ah. Hormarinnada waxaa badanaa ku jira labadab aagaga guud ee ay maamulaan HOA iyo aagaga gaarka ah ee ay leeyihiin mulkiileyaasha gaarka ah ee guryaha.

BMP yada dhismaha ee ay Maamulaan HOA

HOA yada ayaa badanaa masuul ka ah ilaalinta BMP-yada dhismaha ee aagaga guud, ayna ku jiraan goobaha baakinka iyo wadooyinka gaarka ah ee la wadaago. Sidoo kale waxay masuul ka yihiin ilaalinta BMP-yada waawayn ee daaweeya biyaha daadka ee ka yimaada goobaha guud iyo dhismayaasha badan ee ku jira HOA ga gaarka ah.

Noocyada BMP-yada ay maamulaan HOA yada ayaa u dhexeeya balida waawayn ee biyaha qabta ilaa tuubooyinka guud ee biyaha daadku maraan.



BMP-yada Geedaha lagu beeray





ismaamulka san diego

BMP-yada Dhismaha ee ay Maamulaan Mulkiileyaasha Gaarka ah ee Dhismaha

Mulkiileyaasha gaarka ah ee guryaha ayaa masuul ka noqon kara ilaalinta BMP-yada dhismaha ee ku xiran gurigooda. Caadiyana, BMP-yadaan ayaa keliya maareeya biyaha daadka ee ka yimaada guri gaar ah, waxayna u dhexayn karaan xajmiga marinada yar ee biyaha roobka ilaa BMP-yada aaga beeraha.

Dukumiintiyada BMP ga Dhismaha

Heshiiska **Ilaalinta Biyaha Daadka Roobka** ayaa maamulaaya waajibaadka dayactirka BMP yada dhismaha ee HOA. Inta badan BMP-yada qaybta ka ah qorshaha la ogol yahay ee hormarinta goobta ayaa lahaan doona dukumiintigaan oo ku jira galka ay hayso Ismaamulku.

Heshiiska Ilaalinta Biyaha Daadka ayaa qeexaaya shuruudo gaar ah oo uu leeyahay BMP-kasta, ayna ku jiraan shaqooyinka kormeerka iyo dayactirka, wuxuuna aqoonsadaa cida masuulka ka ah shaqooyinka. Xaalada asalka ah ee dhismaha iyo qaybaha farsamada ayaa lagu qori doonaa Qorsheyaasha Diiwaanka (ama Sida Loo dhisay), uuna la socdo Qorshaha Maamulka Tayada Biyaha Roobka ee dhismaha. Qorsheyaasha Diiwaanka ayaa tixraac muhiim ah u ah shaqooyinka dayactirka muddada fog sida dayactirada dhismaha, kuwaasoo muhiim u ah in la sameeyo si loo xaqiijiso shaqada BMP-ga.

Xogta gaarka ah ee ku saabsan BMP-yada dhismahaaga ayaa laga heli karaa dukumiintiyada soo socda:

- Heshiiska **Ilaalinta Biyaha Daadka ee Dhismahaaga** oo uu kaa hayo Xafiiska Diiwaannada ee Ismaamulka (arcc.sdcounty.ca.gov);
- Qorsheyaasha la ogolaaday ee goobta dhismaha ee gurigaaga (srs.sandiegocounty.gov); ama
- Qorsheyaasha kale ee dayactirka oo ay ku siisay shirmada gurigaaga dhistay.



BMP-yada Geedaha lagu beeray

Hayso oo Xaqiiji BMP-yadaada

Maareeyaasha HOA iyo mulkiileyaasha gaarka ah ee BMP-yada ayaa masuul ka ah xaqiijinta sanad kasta in BMP-yada gurigooda la ilaaliyo. Si aad xog badan uga ogaato noocyada gaarka ah ee BMP-yada dhismaha iyo sida loo ilaaliyo, aadna u aragto tilmaamaha adeegsiga barta oonlaynka ah si aad u dirto xaqiijintaada dayactirka ee sanadka kasta, booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater waana in la riixaa Joogteynta Dhismahayega ee astaanta BMP..



Haddii aadan si sax ah u dayactirin BMP-ga dhismahaaga, ama aadan soo dirin xaqiijinta dayactirka ee sanadlaha ah, kormeere ka socda Ismaamulka ayaa laga doonayaa inuu tago goobtaada ama uu bilaalo baaritaanka sharci fulinta.

waad ku mahadsan
tahay samaynta
qaybtaada si

loo ilaaliyo
marinadeena biyaha

Haddii aad qabto su'aalo, Nagalaso Xariir:

Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha

1-858-495-5323

BMP.Program@sdcounty.ca.gov

www.sandiegocounty.gov/stormwater